



# Aqoonyahanka Rhodes ee JT Flowers ayaa ka hadlaaya koritaankii uu ku soo koray Albina, ciyaarta kubadda kolayga, helitaanka meel uu muhiimada siiyo ee Yale

*Bishii la soo dhaafay, JaVaughn "JT" Flowers wuxuu noqday mid ka mid ah 32 qof oo Maraykan ah ee la siiyay abaalmarinta Deeqda Waxbarasho ee Rhodes ee 2018-ka, oo ah mid ka mid ah abaalmarinta ugu qiimaha badan dalka. Flowers, 24, wuxuu ku dhashay kuna barbaaray xaafadda Albina ee Portland isaga oo soo dhigtay Dugsiga Sare ee Lincoln iyada oo ay qayb ka ahayd barnaamijka habka waxbarid ee luqada. Toddobaadkii la soo dhaafay, Flowers – oo u bixi doona laba sano oo uu dayrta soo socota ku soo qaadan doono Jaamacadda Oxford University ee ku taala Ingiriiska -- ayaa u fariistay wareysi lagaga qaaday Dhismaha Dowladda ee 911, halkaasi oo uu ka shaqeeyo xafiiska Wakiilka Maraykanka ee Earl Blumenauer.*

## **Xagee iyo sidee ayaad u ogaatay inaad heshay Deeqda Waxbarasho ee Rhodes?**

Habka ay u shaqeysyo waa, waxay kaga dhawaqaan isla goobta, ka dib isla marka ay dhammaan dadka finalka iskugu soo baxay dhammeystaan wareysigooda. Dhab ahaantii garsoorayaashu waxay soo galeen qolka – wareysiyada waxaa lagu qabtay Seattle – waxaa saf la geliyay 16 finalka iskugu soo baxay, iyada oo toddoba (garsoore) ay goobta soo galeen, iyaga oo dhahay ereyo kooban, ka dibna magacyada labada qof ee ku guuleystay ugu dhawaaqay sida ay xarfaha magacyadoodu u kala horreeyeen. Sidaas ayay ahayd.

## **Ma waxaad ahayd qofkii koowaad mise labaad?**

Waxaan ahaa kii koowaad. Waan la fajacay Wuxaan si buuxda niyada uga saaray fikirka ah in ay muuqatay in aan guulaysan karayo lahaa marka la eego sida aan is dhahaayay wareysiga ayaa u dhacay, iyo marka la eego sida wanaagsan ee ay ahaayeen dhammaan kooxaha kale ee finalka iskugu soo baxay. Wuxaan waqtii badan ku qaataay in aan iyaga la hadlo labadii maalmood ee nidaamka wareysigu lagu jiray, runtiina si aad ah ayaan isku baranaynay aniga oo dadka kale soo xiganaya. Uma maleynaynin in ay jireen.

## **Ma xasuusataa sida aad uga jawaab celisay?**

Aad baan ula fajacay, waxaan bilaabaty oohin. Uma maleynayo in aan wax dhahay. Wuxaan ku jiray xaalad aan galay oo aan rumaysad lahayn. Waxbaan qaban kari waayay, waxaan ooyayay qiyaastii 10 daqiqo, ilaa ay gaareen heer ay isku dayaan in ay i weydiyaan su'aalo ku saabsan sida aan dareemay, xataa ma hadli karayn, xataa xataa sheegi kari waayay weedho iyo erayo la fahmi karo. Waxay ahayd mid aad iiga qiiraysiisay.

## **Waxaad tahay mid ka mid ah 10 Maraykanka Madow ah oo Abaalmarinta Aqoonyahanada ee Rhodes helay sanadkani, taasi oo ah tiradii ugu badnayd abid loo magacaabo. Maxay tani kaaga dhigan tahay?**

Waa mid si gaar dhiirigelin u leh marka la eego sida nidaamka xulashada u shaqeeyo. 32 Aqoonyahan ayaa laga soo xushay 16 degmo oo ku yaal Maraykanka. Degmo kasta, waxaa ku jira 16 finalka iskugu soo baxay, iyada la oo xushay labo. Waxaa soo xushay guddi si buuxda u madax banaan oo aanan midba midka kale xiriir la lahayn, sidaas darteed xaqiqda ah in heerkani matalaadu uu awood u yeeshay in uu xoojiyo nidaamkaasi waxay muujinaysaa in deeqda waxbarasho ay dhab ahaantii bilowday in firo gaar ah loo yeesho sida ay muhiimka u tahay si fursadahan noocan oo kale ay u heli lahaayeen dadka taariikh ahaan la takooray isla markaana cid matalaysaa aanay jirin.

***Waxaad tahay ilme reer Albina ah. Waxaad aragtay xaafaddaada oo waxoogaa isbedeshay. Ma ka hadli kartaa kala duwanaanshaha u dhexeeya waxaad hada halkaasi ku aragto iyo waxa aad ka xusuusato markii aad ilmaha ahayd.***

Waxaan koray waqtigii uu sida aadka u socday dib u dhiska guryaha ee Waqooyi, Waqooyi bari Portland. Markii aan dhashay 1993-kii, xaafadaydu waxay qiyaastii boqolkiiba 69 ahayd dad madow, qiyaasta qiimaha gurigu wuxuu u dhexeeyay \$45,000 ilaa \$50,000. 2010-kii, xaafadaydu waxay ahayd qiyaastii 65% ahayd dad caddaan ah, qiyaasta qiimaha gurigu wuxuu u dhexeeyay \$450,000 ilaa \$500,000. Taasi waa isbedel dhacay aniga oo nool. Waxyasi oo dhani markii ay dhacayeen waxaa joogay halkan Portland.

Waa wax xiiso leh. Waxaa jira waqtio marka aan ka maqanahay guriga oo aan ka fikirayo carruurnimaydaydii aan dareemo sidii aan qiyaasayo oo kale qaar ka mid ah waayo-aragnimadii aan soo maray. Ka dibna waxaa jira waqtio marka aan dhex socdo xaafaddan sida ka badbadiska ah dib loogu dhisay, iyada waxyabuhu leeyihii dareen la garanayo oo aan caadi ahayn kaasi oo runtii ah mid aan sahlayn. Taasi ma aha jawaab nadiif ah marka la eego su'aashaasi, laakiin taasi waa nooca halka aan ka taaganahay arrinta.

***Waxaad ahayd ciyaaryahan xidig ah oo kubadda kolayga u ciyara Lincoln, oo si joogta ah uga qayb gala tartanka gobolka adiga oo sanadkii hore ee dugsiga dhiganayay. Intee in le'eg ayuu waqtigaasi ahaa muhiimada noloshaada?***

Ka imaanshaha halka aan ka imaanayay, ma jirin meel kale oo bannaanayd, iyada oo kubadda kolayguna gaar ahaan ahayd mid ka mid ah xarkaha loo fidiyay dadka ku nool Waqooyi, Waqooyi bari Portland, si ay naftooda uga saaraan xaaladaha ay ku sugnaayeen. Wuxuu qaataay dhinac kasta oo ka mid ah aqoonsigaya iyo shakhsiyadeyda. Wuxuu qaataay waqtigeyga oo dhan. Waxyaan soo toosayay 5:30 aroornimadii saddex ama afar jeer toddobaadkii, aniga oo qabsanayay Baska Lambar 6, una qaadanaya webiga dhankiisa kale, oo samaynayay 500 tuuris kubaddeed ka hor inta aanan bilaabin dugsiga subaxdii. Waxyaan aadayay goobta jimicsaga waqtiga qadadii, laga bilaabo 12 ilaa 12:40, iyada mid ka mid ah saaxiibadayda igu soo boodayo 'rebound', ka dibna kubadda tuur tuuraya. Waxyaan sii joogi jiray dugsiga ka dib aniga oo jimicsanayay ka hor inta aanan tababarka qaadan. Waxay ahayd waaberiga ilaa gabal dhaca.

***Oo markaa ma waxaad sawiranseysay adiga oo ka tirsan NBA?***

Haa, taasi waxay ahayd riyada. Taasi waxay mar kasta ahayd riyada.

***Sidee ayaad muhiimadaada uga soo leexisay kubadda kolayga oo aad ugu leexiyay tacliinta?***

Bilowgii sanadkaygii labaad ee dugsiga, waxaan ka dhaawacmay canqowda/kuraanta taasi oo aad hoos ugu dhigtay dardartaydii iyo awoodaydii ciyaared ee jireed. Aniga oo hore ugu soo laabtay ciyarta, ugana sii daray dhaawicci, isla markaana aan ahayn ciyartoy la mid ah sidii aan hore u ahaan jiray.

Waxaan sidoo kale go'aansaday in aan bedelo kooxaha AAU xagaaga intii u dhaxeysay sanadkaygii labaad iyo sanadkaygii u dambeeyay, kaasi oo ah xagaaga ugu muhiisam, marka la eego is xulashada. Iyada oo fikirkaygu ahaa, aniga oo rabay in aan aado dugsi weyn. Waxaan rabay in aan aado UCLA, ama USC, umana aan maleynenin in tababarayaashaasi ay joogi doonaan ciyarahayga haddii aan sii wado in aan u ciyaaro kooxdayda meel ka baxsan Portland. Sidaas darteed waxaan u bedeshay koox la yiraahdo Double Pump oo xarunteedu tahay Los Angeles. Waa mid tartan badan leh, waxaan ka tegay aniga oo ah ciyaryahanka ugu fiican kooxdayda halkan ee Portland aniga oo noqday ciyaryahanka afaraad ama shanaad ee ugu fiican kooxdayda. Taasi oo macnaheedu yahay inkasta oo tababarayaal aad u sarreeyaa ay joogeen ciyarahayga, waxay ii arkeen in aan ahay ciyaryahan kaalintiisa qaadanaya halkii ay iiga arki lahaayeen qof ay suurtagal tahay in uu barnaamijka wax u taro.

Marka la iskugu daro labadan waxyaabood – ee dhaawaca isoo gaaray iyo go'aanka nasiibka ah ee aan qaatay iyo u tartanka xiddigaha – ayaa keenay in ay si buuxda hoos ugu dhacdo qimihii la igu xulanayay. Dugsiyo badan ayaa meesha ka saaray dalab ay siiyeen markii hore.

***Waxaad ku dampaysay Yale [ka dib qorshe muddo dheer socday oo fasallada dib loogu qaadanayo, ka dibna sanad aan ku qaatay dugsiga loo hoydo]. Sidee ayay Yale diiradaada u soo gashay?***

Waxaa jiray kaaliyaha tababaraha oo joogay Yale oo magiciisa la yiraahdo Matthew Kingsley, wuu i soo wacay. Xataa ma garaneyn halka ay Yale ku taalay. Waxaan maqlay magaca, laakiin xataa ma garaneyn waxa macnaheedu ahaa. Wuxuu dhahay: 'Meesha aad tegayso dugsiga go'aanku ma ahan mid ku saabsan afarta sano ee soo socota ee noloshaada. Waa go'aan ku saabsan 40 sano ee soo socda.' Waa xeelad la isku xulanayo oo wanaagsan.

***Sidee dhakhsa ah ayaad u ogaatay sida ay Yale qaddarinta u leedahay?***

Waan Google gareeyay isla markii aan telefoonka ka dhigay isaga. Waa la yaabay. Umaan maleynayn in ay jirto in aan awoodi karo in aan gelo meel sidaasi oo kale ah.

***Waxaad kubadda kolayga hal sano oo kaliya u ciyartay Yale adiga oo muhiimadaada oo dhan u leexiyay tacliinta. Sidee ayuu isbedelku u dhacay?***

Kubadda kolayga waxay mar walba ahayd meel aan u baxsado, hab aan ku daboolo culayska i haystay isla markaana u yareeyo, iyada oo ahayd qaab badbaado marka la eego dhammaan fowdada aan ku soo koray. Markii aan jaamacadda aaday, waxaan aan u dareemay in kubadda kolaygu ay ahayd halka uu ka imaanayay culaysku. Waxaan niyadda ka saaray fikirka ah in aan u ciyari doono NBA, waan ogaa in markabkaasi dhaqaqaqay. Sidaas darteed waxaa jiray dhammaadka ciyarta kubbadda kolayga oo aan lahaa, taasina waxay igu riixday in aan bilaabo ka fikirka waxa ay noloshayda u ekaan doonto marka aan ka tago ciyarta, waxaan garwaaqsaday in aanan si fiican u diyaar garoobin wax kale oo fursad ah oo aan ku lug laheyn ciyarahaa.

Waxaan bilaabay in ay si aad ah uga turjunto carruurnimadeydi iyo qaar ka mid ah sababaha aan u koray aniga oo dareemaya in aan kaliya haystay hal fursad oo ii bannaanayd. Taasina waxay ii horseeday in aan dunida u arko si ka duwan sidii hore. Waxaan ogaaday xaalada iyo duruufta i haysata ay saaxiibo badan oo aan leeyahay iyo xubno badan oo ka tirsan qoyskaygu ay ku noolaayeen noloshooda ay ka dhasheen go'aano la gan oo ay gaareen siyaasad dejiyayaasha iyo hay'adaha dawladda. Iyada oo go'aannadani ay qaab u yeelaan nolosha dadka iyo dhabaha ay u socdaan. Sidaa darteed haddii aan rabo in aan kaalin ka ciyaaro sidii aniga oo eegayo duruufaha ii gaarka ah dadka u siin lahaa helitaanka fursad, waxay ahayd in aan fahmo qaababka fursadaasi loogala hadlo dadka.

***Boggaaga Facebook, waxaad ku qortay in ay jirtay wakhti noloshaada ka mid ah oo aad niyada gelisay in aad ka baxdo Portland oo aadan marnaba ku soo laaban. Sidee ayay taasi isku bedeshay?***

Waxaa jiray isbedel dhanka fikirka ah, oo aanan filayn haba yaraatee. Isla markii aan halkan ka soo baxay, waan faraxsanaa, waxaana u maleynayaa in qof kasta oo xaafadayda iyo bulshadayda ka tirsanaa ay sidoo kale igu farxeen. Markii aan ka soo baxay, hooyadey, farxad daraadeed dayaxa korkiisa gaartay, sababta oo ah waxay dareentay in ay shaqadeedii qabsatay, waxay wiilkeeda ka soo dhex saartay dabinkan uu ku jiray ee uu ku dhashay.

Waxaan qabaa in dad badan oo ka mid ah bulshada aan ka tirsanahay ay meeshan u arkaan magaalo caburisa wixii fursad ah, iyada oo aan inta badani u maleynayo in ay run tahay. Laakiin markii aan ku jiray kulliyadda, waxaan bilaabay in galo safar caalami ah aniga oo isticmaalaya lacagta Yale, sababta oo ah waxaan ku jiray deeq waxbarasho oo dhan, waxaanan ogaaday dhibaatooyinka ka jira Portland, ay yihiin kuwo gaar u ah Portland, laakiin waa kuwo jiro oo muujinaya marka la eego heerka guud ee adduunka oo dhan.

Waxaan runtii xiiseynayay arrimaha caalamiga ah iyo xuquuqda qoxootiga iyo helitaanka fursadda ee dhallinyarada qoxootiga ah ee ku nool Galbeedka Yurub, iyada oo qaar ka mid ah saaxiibadey ay igu riixeen in aan bilaabo in aan ka fikiro waxa toos ugu lug yeelashadayda wadahadalkaasi uu ahaa. Waxay yiraahdeen, haddii aad ogaatid in aadan si toos ah ugu lug lahayn wadahadalkaasi, su'aasha xigta ee ay tahay in naftaada weydiiso waa, meesha aad awoodi kartid in aad si toos ah uga qayb qaadato oo aad yeelatid ku lug lahaansho maco leh marka la eego aragtida nooc ka mid ah isbedelka la samayn karo. Jawaabtuna kaliya waxay ahayd guriga, waxay ahayd Portland.

-Mike Tokito